

SHARCI L. 6, Tr. 4 Jenayo 1975.

Xeerka Habka Madniga ah Buugga I qaybta V — Awoodda Garsooraha — qodobkiisa 80 aad oo la kordhiyey.

### MADAXWENYAH

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad tii 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 34 ee soo baxay  
22-9-1974 — Nidaamka Garsoorka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 19 ee soo baxay  
27-7-1974 — Xeerka Habka Madaniga ah;

ISAGOO AQOONSAN In ey lagama maarmaan tahay dacwooyinka Dawladda iyo Wakaaladaha Madaxa-bannaan ey dhinac ka yihiin si xilkasnima ah looga difaaco Maxkamadaha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo  
kan Xoghayayaasha Dawladda;

#### WUXUU SOO SAARAYAA:

In Xeerka Habka Madaniga ah — Buugga I qaybta V — Awoodda Garsooraha lagu kordhiyo sida hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Qodobka 80 bis

1. Dacwooyinka Dawladda iyo Wakaaladaha Madaxa-bannaan ey dhinac ka yihiin, Garsooraha waxaa waajib ku ah in uu xaqiijiyo, dar-yeelo oo uu si xilkasnima ah u difaaco danta guud.

2. Garsooraha, waxaa laga doonayaa in uu ku dadaalo xoolaha Dawladda iyo Wakaaladaheeda Madax-bannaan si aan marna si sharcidarra ah xuquuqdooda loo dhaafsiin Maxkamadaha hortooda, xataa haddii eysan si habsami ah u difaacin xubnaha Wakiilka u ah Dawladda, mar walba waa inuu isagu iskiisa u ilaaliya danaha guud, isagoo dhow-rayo Sharciga.

Qodobka 2aad

Dhaqan gelin

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa marka laga bilaabo taariikhda 15-12-1974, waxaan lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga as ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 4 Jenayo 1975.

MADAXWEYNHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre